Sidan ayaad u heli kartaa baadhitaanka koronaha ama aad u heli kartaa daryeel marka aad joogto Oulu

Baadhitaanka koronaha waxaa tagi kara dhammaan dadka leh calaamadaha koronaha, sida xummad, qufac, cune xanuun, cabudhnaan, neef qaadashada oo adkaata, waayidda dareenka urta ama dhadhanka ama shuban iyo calool xanuun aanan sabab lahayn.

Isla calaamadahaas kuwo lamid ah waxaa leh hargabka caadiga ah. Sababtaas awgeed ayaan astaamaha xanuun oo kaliya lagu kala ogaan karin, inuu qofku hargab caadi ah hayo iyo inuu korona jiro. Waxaa aad u muhiim ah in baadhitaanka la tago isla markaaba haddii aad isku aragto xattaa calaamado khafiif ah. Haddii aad leedahay calaamado xanuun waa in aad guriga joogtaa oo aad iska ilaalisaa in aad xidhiidh la samayso dadka kale. Baadhitaanka koronuhu waa lacag la'aan.

Haddii calaamadaha xanuunkaagu ay yihiin kuwo khafiif ah waxaad qabsan kartaa ballanta baadhitaanka korona oo kaliya

Waxaad qabsan kartaa ballanta qaadida saamiga ee goobta saamiyada lagu qaado ee Limingantulli (oo furan isniin-axad) ama xafiiska koronaha (oo furan isniin-jimce).

- Maalmaha shaqada isniin-jimce ka qabso ballanta adeegga ballan qabsashada ee nolol wanaagga adiga oo u soo maraya. Ballan qabsashadu waxaay furmaysaa fiidka ka horeeya maalinta shaqada markay saacaddu tahay 21.
- Dhammaadka isbuuca sabti-axad ka qabso ballanta Nordlab adiga oo soo maraya. Ballan qabsashada dhammaadka todobaadka waxaa la furaa jimceyaasha saacadda 16-ka.

Haddii aanad awoodayn inaad ku adeegatto luqadda finishka, ingiriiska ama iswidhishka waxaad heli kartaa caawimaad dhanka luqadda ah oo aad ka helayso la talinta luqadaha badan ee magaalada Oulu

Waxaad iman kartaa xarunta koronaha adiga oo aanan ballan soo qabsan oo galaya safka. Haddii wakhtiyada qaadista saamiyada ee maalinimadaas ay dhamadeen ama aanad awoodaynin in aad ballan ku qabsato af finish ama ingiriis. Waxaa kuu wanaagsan in aad goobta timaado inta aanan la gaadhin 14 (jimceyaasha inta aanan la gaadhin 13), si saamida lagaaga qaado intaanan xarunta la xidhin. Soo qaado kaadhka Kela-da, aqoonsi sawir leh ama baasaboor. Xarumaha koronuhu waxaay ka shaqeeyaan Kontinkangas, Tuira, Haukipudas iyo Oulunsalo xarumaha ku yaalla ee heeganka ah.

Haddii aad u baahato qiimeynta xirfadlaha ama daryeel

Omaolo ama latalinta koronaha ayaad ka helaysaa hagitaanka qaabdhaqanka iyo haddii loo baahdo waxaa lagugu hagayaa qaadista saamida ama xarunta koronaha.

- ka jawaab su'aalaha aad ku qiimeyn karto xaaladdaada ee adeegga Omaolo ku kira ama
- soo wac nambarka hagista koronaha ee Magaalada Oulu 08 558 41414 (isniin-khamiis saacadaha 8-16, jimce saacadaha 8-15)
- Fiidadkii iyo wiikendhiyada soo wac nambarka heeganka guud ee aagga Oulu 08 315 2655.
- Haddii xaalad degdeg ahi jirto, soo wac 112.

Haddii aad ka tirsantahay kooxda dadka u nugul xanuunka si degdeg ah ula xidhiidh.

Haddii aanad awoodayn inaad ku adeegatto luqadda finishka ama ingiriiska waxaad heli kartaa caawimaad aad ka helayso la talinta luqadaha badan ee magaalada Oulu Xarunta koronaha wuxuu sidoo kale qofku iman karaa iyada oo aanu la soo xidhiidhin. Waxaa kuu wanaagsan in aad goobta

timaado inta aanan la gaadhin 14 (jimceyaasha inta aanan la gaadhin 13) Xarumaha koronuhu waxaay ka shaqeeyaan Kontinkangas, Tuira, Haukipudas iyo Oulunsalo xarumaha ku yaalla ee heeganka ah. Soo qaado kaadhka Kela-da, aqoonsi sawir leh ama baasaboor.

Macluumaad wakhtiga la socda oo ku saabsan koronaha oo ku baxaya luqadaha kala duwan waxaad ka helaysaa boggayaga internetka www.ouka.fi/korona

Ciwaanadda goobaha qaadidda baadhitaanka koronaha iyo xarumaha koronaha

saami qaadidda Limingantulli
Nuottasaarentie 5
Wakhtiga waa in hore loo sii qabsadaa.
Wakhtiga furnaanshaha isniin-axad.
Haukipudas
Simppulantie 15 A 3, 90830 Haukipudas
Wakhtiga furnaanshaha isniin-khamiis saacadda 8-16, jimce saacadda 8-15.
Kontinkangas
Kajaanintie 46 A, 90220 Oulu
Wakhtiga furnaanshaha isniin-khamiis saacadda 8-16, jimce saacadda 8-15.
Oulunsalo
Kauppiaantie 10, 90460 Oulunsalo
Wakhtiga furnaanshaha isniin-khamiis saacadda 8-16, jimce saacadda 8-15.
Tuira
Kangastie 12, 90500 Oulu
Wakhtiga furnaanshaha isniin-khamiis saacadda 8-16, jimce saacadda 8-15.
Heeganka nawaaxiga Oulu ka dhexeey
Kajaanintie 50, gudaha waxaa laga soo galayaa albaabka A1-ovi
Kaliya fiidkii iyo wiigendhiyadii, haddii aad u baahantahay daryeel degdeg ah.

La talinta luqadaha badan

La talinta luqadaha badan waxaa lagaaga adeegayaa ugu horrayn iyada oo taleefan ah iyo iyada oo WhatsApp ah.
La talinta luqada badan waxaad caawimaad kaga heli kartaa tusaale ahaan qabsashada ballamaha ama helidda daryeelka, haddii aad ka shikisantahay in aad qaadday korona ama aad u xanuunsantahay. Waxaad heli kartaa sidoo kale la talin arrimo kale xattaa ku saabsan.

Waxaad heli kartaa la talin af finish ah, af ingiriis ah, af carabi ah, af berbari ah iyo af faransiis ah isniin illaa jimce saacadda 9-16.30 Luqadaha kale waxay ku socdaan jadwalka hoos ku yaalla.

af carabi/af berbari/af faransiis tel. 040 651 5687
Goobta la talinta waxaa laga heli karaa qaybta dariiqqa ku taalla ee Oulu10

isniintii saacadda 9-16.30
salaasadii saacadda 9-16.30
arbacadii saacadda 9-16.30
khamiistii saacadda 9-16.30
jimcihii saacadda 9-16
af dari/af farsi tel. 040 484 2993 Latalin fog oo kaliya!
arbacadii saacadda 9-11.
isniintii saacadda 9-12
af shiine/af jabaniis tel. 040 617 4470 Latalin fog oo kaliya!
salaasadii saacadda 13-15
af soomaali tel. 040 589 3052 Latalin fog oo kaliya
arbacadii saacadda 12-15
khamiistii saacadda 9-12
af thai tel. 040 480 6295 Latalin fog oo kaliya!
jimcihii saacadda 14-16
af tigrinja tel. 040 586 1724 Latalin fog oo kaliya!
isniintii saacadda 16-30.18
arbacadii saacadda 16-30
af fietnamiis tel. 040 182 6198 Latalin fog oo kaliya!
jimcihii saacadda 12-14
af turki/af kurdish tel. 040 482 9260 Latalin fog oo kaliya
salaasadii saacadda 15.30-17.30
khamiistii saacadda 15.30-17.30
af ruush/af hollandiis tel. 040 621 1714 Latalin fog oo kaliya
salaasadii saacadda 9-12
khamiistii saacadda 12-15

La talinta luqadaha badanwww.ouka.fi/oulu/villavictor/ohjaus-ja-neuvonta